

DOORASHO DADBAN OO BALLAARAN

Proposal Model — Nidaamka Doorashada Qaranka

1. Hordhac iyo Ujeedada Modelka

Modelkan doorasho wuxuu ku dhisan yahay nidaam dimuqraadi ah oo xor ah, si dadweynaha Soomaaliyeed ay si caddaalad ah, hufnaan leh iyo isla xisaabtan ku dheehan ay ugu doortaan wakiilladooda.

Udub-dhexaadka modelkan waxaa ka mid ah:

- Hal diiwaangelin oo dalka oo dhan ka wada dhacda
- Hal doorasho oo dalka oo dhan hal maalin ka wada qabsoonta
- Nidaamka SEEJO (Kursi-Deegaan) oo ah saldhigga doorashada
- Guddi doorasho qaran oo mideysan, kana turjumaya caddaaladda iyo dheellitirka dhinacyada kala duwan
- Maxkamadda Sare oo leh awoodda qaadista iyo go'aan ka gaarista cabashooyinka doorashada

2. Goobaha Doorashada — Magaala Madaxyada

Doorashadu waxay ka dhacaysaa magaala madaxyada gobolada dalka oo dhan, marka laga reebo goboladda waqooyi Galbeed, Togdheer, Awdal iyo Jubada hoose

Gobol	Goobta Doorashada
Waqooyi Galbeed	Caasimadda Mogadiisu
Togdheer	Caasimadda Mogadiisu
Awdal	Caasimadda Mogadiisu
Jubada Hoose	Magaalo kale Katirsan Gedo ama Jubada dhexe

Sababta loo raro Gobolada Waqooyi iyo Jubada Hoose:

- Gacan ku haynta DFS iyo Maamul Goboleedyada oo aan ka talin

3. Guddi Doorashada — Qaab-dhismeedka

Waxaa la dhisayaa hal Guddi Doorasho Qaran oo dalka oo dhan ka masuul ah qabashada doorashada. Guddigaasi wuxuu maamulaa dhammaan marxaladaha doorashada, laga bilaabo diiwaangelinta codbixiyeyaasha ilaa ku dhawaaqista natiijooyinka kama dambaysta ah.

Dhinaca
Maamul Goboleedyada
DFS — Dowladda Federaalka Soomaaliya

Mucaaradka Siyaasadeed

Mabaadi'da Guddiga:

1. Xubinnimada saddexda dhinac waa la simayaa, si loo xaqiijiyo caddaalad iyo dhexdhexaadnimo
2. Guddigu wuxuu leeyahay madax-bannaani buuxda; xukuumaddu faragelin kuma yeelan karto
3. Go'aannada guddiga waxaa lagu gaaraa cod aqlabiyad ah (majority vote)
4. Guddigu wuxuu u shaqeeyaa si hufnaan (daah-furnaan) iyo isla xisaabtan leh

4. Nidaamka SEEJO — Kursi-Deegaanka

Kursi kasta (HOP) wuxuu noqonayaa deegaan doorasho gaar ah oo loo yaqaan SEEJO. SEEJO kasta waxay leedahay xuduud cad, codbixiyeyaal si rasmi ah u diiwaangashan, iyo musharraxiin u tartamaya kursigaas.

Qaabeynta Seejada	
Magaca	SEEJO (Deegaanka Kursiga) lagu saleeyay xeerkaa astaynta xildhibaanada ee HoP ka lagu sameeyay
Xudduudaha	Waxay ku xidantahay xudduudaha kursiga
Maamulka	Guddi Doorasho ayaa maamula
Diiwaan-galinta codbixiya	Cidkasta oo reerka kursiga leh oo shuruudaha buuxiya
Musharraxnimada	Cidkasta oo reerka kursiga leh ah oo shuruudaha buuxiya

5. Diiwaan-galinta — Hal Mar, Dalka Oo Dhan

Fikradda aasaasiga ah: Hal diiwaangelin oo dalka oo dhan isla mar la furo, isla muddona la xiro — si loo hubiyo caddaalad iyo sinnaanta fursadaha.

5.1 Diiwaan-galinta Codbixiyeyaasha

Xogta Muhiimka ah	
Muddo	5 — 10 maalmood
Goobaha	Seejo kasta — isla wakhtiga furanaysa
Xaq u leh	Cidkasta oo reerka kursiga leh oo shuruudaha buuxiya
Dalka	Oo dhan — hal mar, isla wakhtiga hadaysan farsamadu diidin
Natiijada	Liiska rasmiga ah ee codbixiyeyaasha la xaqiijiyo

Socodka diiwaan-galinta codbixiyeyaasha:

1. Guddigu wuxuu ku dhawaaqaa taariikhda iyo goobaha diiwaangelinta
2. Goobaha diiwaangelinta waxaa dalka oo dhan laga furaa isla maalintaas, isla waqtigaas
3. Muwaadiniintu waxay iska diiwaangelinayaan SEEJO-ga ay deggan yihiin
4. Maalinta (qorshaysan), goobaha diiwaangelinta waa la xirayaa
5. Liisaska codbixiyeyaasha waxaa lagu xaqiijinaya 2–3 maalmood gudahood kadib xiritaanka diiwaangelinta
6. Nidaamka diiwaangelintu waa inuu noqdaa mid biometric ah, si looga hortago isdiiwaangelin laba jeer ah (isdiiwaangelin isdaba-joog ah).

5.2 Diiwaan-galinta Musharraxiinta

Xogta Muhiimka ah	
Muddo	7 maalmood (ka hor diiwaan-galinta codbixiyeyaasha)
Goobaha	Xarunta Guddiga Doorahsada ee Gobolkaas
Xaq u leh	Cidkasta oo reer kursiga oo shuruuda buuxiya
Natiijada	Liiska rasmiga ah ee musharraxiinta oo la shaaciyo ka hor doorashada 10 bari si cidii dood qabta ay usoo gudbiso doodeeda.

Shuruudaha Musharraxnimada:

- Dhammaan shuruudaha ku xusan Dastuurka Fadaraalka soomaaliya
- Lacag diiwaan galin oo macquul ah si loo ogaado ka go'naasha musharaxa

6. Xuquuqda Musharraxka —

Si loo hubiyo caddaaladda iyo daahfurnaanta doorashada, musharraxa kasta wuxuu leeyahay xuquuq saddex xagal ah

6.1 Xaqa La-socodka Diiwaan-galinta**Musharrax kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu si buuxda ula socdo habraaca diiwaangelinta:**

- Wuxuu booqan karaa xafiiska diiwaangelinta ee SEEJO-giisa si uu u hubiyo liiska codbixiyeyaasha
- Wuxuu weydiin karaa sababaha sharci ee ka dambeeya ka-reebitaanka codbixiyeyaasha, kuna dalban karaa caddeyn rasmi ah
- Wuxuu soo gudbin karaa cabasho rasmi ah haddii uu ka shakiyo habka diiwaangelinta
- Wuxuu u diri karaa wakiil gaar ah xafiiska diiwaangelinta si uu ugu soo gudbiyo warbixin
- Wuxuu xaq u leeyahay inuu ogaado tirada rasmiga ah ee codbixiyeyaasha ka hor maalinta doorashada

6.2 Xaqa La-socodka Codbixinta

Maalinta doorashada musharrax kasta wuxuu leeyahay xuquuqaha soo socda:

- Wuxuu u diri karaa wakiil (Polling Agent) goobta codbixinta ee SEEJO-giisa
- Wakiilkaasi wuxuu xaq u leeyahay inuu si joogto ah u joogo dhammaan marxaladaha codbixinta
- Wuxuu diiwaangelin karaa wixii khaladaad ama xadgudub ah ee ka dhaca goobta
- Wuxuu codsan karaa caddaynta iyo faahfaahinta tirinta codadka inta ay socoto
- Wuxuu gudbin karaa cabasho degdeg ah haddii uu arko wax is-daba marin ama khalad ah
- Wuxuu heli karaa nuqul rasmi ah oo natiijooyinka goobta ah marka tirinta codadka la soo gabagabeeyo

6.3 Xaqa La-socodka Tirinta Codeeda

Tirinta codadka waxay u baahan tahay hufnaan iyo daah-furnaan buuxda. Musharrax kasta wuxuu leeyahay xuquuqaha soo socda:

- Wuxuu u diri karaa wakiil (Counting Agent) xafiiska tirinta codadka
- Wakiilkaasi wuxuu xaq u leeyahay inuu la socdo dhammaan habraaca tirinta codadka
- Wuxuu arki karaa sida codad kasta loo tirinayo
- Wuxuu codsan karaa in dib loo tiriyo codadka shaki ku jiro
- Wuxuu xaq u leeyahay inuu saxiixo ama diido natiijooyinka rasmiga ah
- Wuxuu heli karaa nuqul rasmi ah oo natiijooyinka ah, oo ay saxiixeen guddiga doorashada

7. Maxkamadda Sare — Xaqa Cabashada Doorashada

Si loo hubiyo xuquuqta sharciga ah ee dhammaan dhinacyada ku lug leh doorashada, Maxkamadda Sare ee Dalka waxaa lagu siinayaa awood gaar ah.

Arrimaha	Faahfaahin
Awoodda Maxkamadeed:	Maxkamadda Sare oo keliya ayaa leh awoodda garsoorka doorashooyinka.
Cabashooyinka la aqbal:	Cabashooyinka la xiriira wax kasta oo khilaafsan xeerarka iyo heshiisyada doorashada.
Cidda cabasho gudbin karta:	Musharrax kasta, Guddiga Doorashada, ama wakiilka rasmiga ah.
Waqtiga cabashada:	48 saacadood gudahood kadib marka natiijooyinka si rasmi ah loo shaaciy.
Fulinta xukunka:	Guddiga Doorashada waxaa ku waajib ah inuu u hoggaansamo go'aamada Maxkamadda.
Xukunnada kama dambaysta ah:	Maxkamaddu waxay soo saari kartaa xukun kama dambays ah oo lagu soo afjaro khilaafka doorashada.

Noocyada Cabashooyinka La Aqbali Karo:

1. Khilaaf ku saabsan liiska codbixiyeyaasha, gaar ahaan marka lagu eedeeyo khalad ama been-abuur sharci ah
2. Musuqmaasuq doorasho ama falal sharci-darro ah oo saameeya hannaanka doorashada
3. Codsiyada dib-u-tirinta codadka marka laga shakiyo khalad ama khiyaano
4. Ka-reebitaanka musharrax ama codbixiye si aan waafaqsanayn xeerarka doorashada
5. Tallaabo kasta oo kale oo ka hor imaanaysa xeerarka doorashada

Hannaanka Cabashada:

1. Musharraxku wuxuu gudbiyaa cabasho qoran oo ay la socoto caddayn rasmi ah
2. Maxkamadda Sare waxay go'aan ka gaartaa cabashada 72 saacadood gudahood
3. Guddiga Doorashadu wuxuu fulin karaa dib-u-tirin rasmi ah haddii Maxkamaddu amarto
4. Go'aanka Maxkamaddu waa kama dambeys, waxaana ku waajib ah dhammaan dhinacyada inay u hoggaansamaan

8. Jadwalka Marxadaha — Timeline Guud

1	Dhawaaqista Maalinta 0	Guddiga Doorashadu wuxuu ku dhawaaqayaa taariikhda doorashada — dalka oo dhan isla mar
2	Diyaarinta Maalmaha 1-7	Waxaa la diyaarinayaa goobaha codbixinta, la tababarayaa shaqaalaha, lana gaarsiinayaa qalabka doorashada
3	Diiwaan-galin Codbixiyeyaasha Maalmaha 8-17	Dalka oo dhan isla mar — muddo 10 maalmood ah — goobaha codbixinta oo dhan waa la furayaa (diyaarin/diwaangelin kama dambeys ah)
4	Xaqiijinta Liisaska Maalmaha 18-20	Liisaska codbixiyeyaasha waa la xaqiijinayaa, dib ayaa loo eegayaa lana saxayaa
5	Diiwaan-galin Musharraxiinta Maalmaha 21-27	Dalka oo dhan isla mar — muddo 7 maalmood ah — liisaska waa la shaacinayaa lana baahinayaa
6	Xaqiijinta Musharraxiinta Maalmaha 28-30	Shuruudaha musharraxiinta iyo codbixiyeyaasha waa la xaqiijinayaa si buuxda
7	Ololaha Doorashada Maalmaha 31-41	Ololaha doorashada musharraxiintu wuxuu soconayaa — 10 maalmood

8	Maalinta Doorashada Maalinta 42	Maalinta doorashada: hal maalin oo dalka oo dhan isla mar ah codbixin ayaa la qabanayaa
9	Tirinta & Natiijooyinka Maalmaha 43	Tirinta codadka waa la sameynayaa isla markiiba, natiijooyinkana waa la shaacinayaa si degdeg ah
10	Cabashada (haddii loo baahdo) 48 saacadood	Maxkamadda Sare waxay go'aannada cabashooyinka ku soo saaraysaa 72 saacadood gudahood

9. Faa'iidooyinka Modelkan

Faa'iido	Sababta
Caddaalad iyo sinnaanta	Dadka oo dhan waxay helayaan fursad siman — isla waqti, isla doorasho
Hufnaan iyo daah-furnaan buuxda	Wakiilada musharraxiintu waxay joogaan dhammaan marxaladaha doorashada
Isla xisaabtan (accountability)	Maxkamadda Sare waxay xukumaysaa khilaafaadka doorashada
Nidaam shaqo oo hufan	Hal maamul oo mideysan ayaa jira — kharash yar iyo nidaam cad
Amni siyaasadeed iyo xasillooni	Dhinacyada oo dhan way ka qayb qaadanayaan — taasoo yareyneysa khilaafaadka
Kalsoonida dadweynaha	Nidaam cad oo hufan ayaa kordhinaya kalsoonida doorashada

DOORASHO XORRTA AH — CADDAALAD — HUFAN

Modelkan wuxuu u adeegaa dalka Soomaaliyeed oo dhan